**GOBOLKA MAINE**

MAXKAMADDA SARE
__________________________ ,gaar ahaan.
Lam. Galka Maxkamadda: _______________

GOBOLKA MAINE
Goob ________________________________
Lam. Galka Maxkamadda: _____________

_______________________________________________Dacweeye

lid

_____________________________________________ La-dacweeye

**AMAR TAAGEERO ILMO**
☐ Ku-meelgaadh ☐ Kama-dambeys
☐ La beddelay ☐ La saxay

1. Amarkan Taageero Ilmo wuxu qayb ka yahay ☐ Xukun furitaan ☐ Amar ka Badbaadin Xumeyn ☐ Xukun Xuquuq iyo Waajibaad Waalid ☐ Xukun Waalid-ahaansho ☐ Amar Maamulis Kiis ☐ Xukun Wax Laga Beddelay ☐ Mas'uul ka-ahhaansho ☐ Dhegaysi Ku-meelgaadh ah ☐ kale ___________________ ☐ ee taariikhdan ☐ ku taariikheysan ______________________.

2. Iyada oo la raacayo 19-A M.R.S. § 2006, maxkamaddu waxay heshay xaqiiqooyin ku saabsan waajibaadka taageero ee waalidka ee hadda markii la xisaabiyay iyada oo la raacay tilmaamaha codsiga. Xaqiiqooyinkaas la ogaaday waxay ku yaallaan xaashida shaqeynta ee taageerada ilmaha ee halkan la socota ee la soo qaatay.

3. _______________________waxa lagu amray inu siiyo ______________________________________________________
*Magaca Ku-qasbane* *Magaca Loo-qasbane*

lacagta ah $ ________________ halkii todobaad/labadii todobaad oo ah taageerada:

| *Magaca Ilmaha* | *Taariikh Dhalasho* | *Magaca Ilmaha* | *Taariikh Dhalasho* |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| | | | |

4. Lacag-bixinta taageerada ilmaha waxay bilaabmaysa _________________________. Haddii ilmo qaato kaalmada dawladda, lacag-bixinta taageerada ilmaha ee ilmahaas waa in loo diro Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka ee Gobolka Maine.

☐ 5. Maxkamaddu waxay ogaatay in ilmuhu hadda qaato kaalmada ku-tiirsane sababta oo ah naafada ku-qasbanaha. Bisha ay dhacdo in kaalmada u qaatay ilmuhu ay la siman tahay ama dhaaftay isku-darka bishii ee waajibaadka taageero, waxa u ku-qasbanuhu heli doonaa tixgalin ah isku-darka qaddarka taageero ee la rabay. Marka ay dhacdo in kaalmada bishii ee ay qaateen ilmuhu aanay u dhigmin waajibaadka taageero ee bishii ee ku-qasbanaha, waxa u ku-qasbanuhu bixin doonaa waajibaadka taageero ee bishii oo laga jaray tixgalinta ay qaateen ilmuhu. Ku-qasbanaha lama siin doono wax ah tixgalin ku saabsan waajibaad wakhti hore ama mustaqbalka ah oo ku saabsan kaalmo dhaafsan waajibaadka taageero ee bishii ee hadda.

☐ 6. Waajibaadka taageerada ilmuhu way jiri doontaa illaa _______________________ (amar dambe ama illaa inta u dhacayo Amar Ka-badbaadin Xumeyn oo jira ama hadba ka soo horeeya).

☐ 7. Waajibaadka taageerada ilmuhu way u socon doonaan ilmo kasta illaa ilmuhu ka gaadho da'da 18 jir; haddii, ilmuhu aanuu qalinjabin, ka bixin dugsiga, ama laga eryin dugsiga sare sida u qeexayo Title 20-A, taageerada ilmuhu way sii socon doontaa illaa ilumu qalinjabiyo ama gaadho da'da 19, hadba ka soo horeeya.

☐ 8. Laga bilaabo ________________________ marka ____________________________ u gaadho da'da 12 jir ee aanay u banaanayn kharashyada sii-hayn ilmo, waxa taageerada ilmaha la yareyn doonaa illaa $______________________ halkii todobaad/labadii todobaad. Laga bilaabo _______________________________ marka ilmuhu _________________________________ gaadho da'da 12 jir ee aanay u banaanayn kharashyada sii-hayn ilmo, waxa taageerada ilmaha la yareyn doonaa illaa $____________________________ halkii todobaad/labadii todobaad.

WAATIXRAAC KALIYA

☐ 9. In alaale inta ay jiraan ______________ carruur xaq u leh taageero ilmo, waxa u ku-qasbanuhu bixin doonaa qaddarka ah $__________________ halkii todobaad/labadii todobaad. In alaale inta ay jiraan _______________________ carruur xaq u leh taageero waalid, waxa u ku-qasbanuhu bixin doonaa qaddarka ah $__________________________ halkii todobaad/labadii todobaad. Marka ______________________ carruurtu xaq u leeyihiin taageero waalid, waxa u ku-qasbanuhu bixin doonaa qaddarka ah $__________________________ halkii todobaad/labadii todobaad.

☐ 10. Qaddarada kor loogu dejiyay taageero ilmo waxay yihiin kuwo ka weecsan qaddarka la qiyaasay ee ay rabaan tilmaamaha taageero ilmo. Kiiskan marka la fiiriyo waxay maxkamaddu ogaatay in amar taageero ilmo oo ku saleysan tilmaamaha u noqon doono cadaalad-daro sababaha soo socda daraadood. *(Deji sababaha ka weecsanaanta.)*_________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________

☐ 11. ☐ Dacweeyaha ☐ La-dacweeyaha ☐ Labada dhinac mid (dhinaca UGU HOREYN qiime caqli-gal ah ku heli kara caymis caafimaad) ayaa heli doona oo haysan doona caymis caafimaad oo gaar ah oo ay anfacsadaan ilmaha aan qaangaadhin haddii hadda lagu heli karo qiime caqli-gal ah. Haddii aan lagu heli karin qiime caqli-gal ah, markaas caymis caafimaad oo gaar ah oo ay anfacsadaan ilmaha aan qaangaadhin ayaa isla markiiba la heli doonaa oo la haysan doonaa marka u noqdo mid lagu heli karo qiime caqli-gal ah. Waa in cadeynta caymiskaas lagu siiyo dhinaca kale 15 maalmood gudahood marka la helo koobiga amarkan, ama haddii aan hadda la heli karin caymiska, 15 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda marka la heli karo. Haddii carruurtu yihiin kuwo qaataa kaalmada dawladda, waa in cadeynta caymiskaas la siiyo Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka 15 maalmood gudahood.

☐ 12. Wixii ah kharasho caafimaad ee aan loo hayn caymis ee ah carruurta, oo dhaafsan $250 halkii sannad taariikheed, waxa loo bixin doonaa habka soo socda: __________% waa ku-qasbanaha iyo, __________% oo ah loo-qasbanaha. Qaybta ah $250 ugu horeeya ee kharashyada caafimaad ee aan caymis loo hayn waxa bixin doonaa ku-qasbanaha.

☐ 13. Waajibaadka taageeradu wuxu ku saleysan yahay xaqiiqda in waalidku si siman u daryeelaan ilmahooda. Kharashyada caafimaad ee aan loo hayn caymis waxa loo qaybsan doonaa sidan soo socota: _______% oo u bixinayo waalidka dakhli sareeya iyo ______% oo u bixinayo waalidka dakhli hooseeya.
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________
________________________________________________________________________________

Haddii Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka ee Maine bixiso adeegyo fulin taageero iyo/ama ku-qasbanaha laga rabo inu taageerada ilmaha siiyo Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka ee Maine, waa in ku-qasbanuhu u Wasaaradda ku ogeysiiyo 15 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda Amarkan waxyaabahan soo socda: 1. Adreeska hadda ee ku-qasbanaha; 2. Magaca iyo adreeska loo-shaqeeyaha u ku-qasbanuhu hadda u shaqeeyo, iyo 3. In ku-qasbanuhu u haysto caymis caafimaad oo ah qiime caqli-gal ah iyo in kale, haddii u haystana, waa inu soo sheego macluumaadka caymiska caafimaad.

15 maalmood gudahood marka u isbeddel ku yimaado adreeska hadda ee ku-qasbanaha, marka wax isbeddel ah ku yimaadaan magaca ama adreeska loo-shaqeeyaha u ku-qasbanuhu hadda u shaqeeyo, marka ay jiraan isbeddel ku yimid macluumaadka caymiska caafimaadka, waa in ku-qasbanuhu u Wasaaradda soo ogeysiiyo isbeddelka. **Haddii isbeddel ku yimid adreeska ama loo-shaqeeyaha oo aan Wasaaradda loo soo sheegin 15 maalmood gudahood kadib isbeddelka waxay taasi tahay jebin sharci madani oo keenaya ganaax aan dhaafsanayn $200 oo la saaro halkii jebin.**

Dhinac kasta oo ay khuseyso tallaabadan ayaa maxkamadda ka xereysan kara Soo-jeedin Wax ka Beddelid u ku weydiisanayo in dib loo fiiriyo qaddarka taageerada ilmaha iyo haddii ay haboon tahay, in wax laga beddelo iyada oo waafaqsan tilmaamaha taageerada ilmaha ee gobolka. Haddii ay ka soo wareegtay wax ka yar 3 sanno markii la soo saaray ama wax laga beddelay amarka taageerada ilmaha, waa in dhinaca wax weydiisanaya u xaqiijiyo in isbeddel muhiim ah ku yimid xaaladaha.

WAA TIXRAACKALIYA

☐ 14. Amarkani wuxu u hogaansan yahay Ka-xejinta Dakhli Isla Markiiba ah laga bilaabo taariikhdan (Fiiri Ogeysiis hoose)(Haddii aanay ahayn fiiri 15 hoos).

**Ogeysiis ku Socda Dhinacyada oo ku Saabsan Ka-xejinta Dakhliga ee ah Isla Markiiba.** Ka-xejinta dakhli ee ah isla markiiba waxa kaliya ee la hirgalin karaa marka koobi xaqiiqsan oo ah amarka taageerada, oo u weheliyo ogeysiiska u rabo xeerka § 2655, loo geeyo bixiyaha dakhliga ku-qasbanaha. Iyada oo aan la fiirin xeer hoosaadkan, waxay wasaaraddu hirgalin kartaa ka-xejinta dakhliga ee isla markiiba ah iyada oo aan la bixin koobi xaqiiqsan oo ah amarka taageerada marka gacanta laga saaro ogeysiiska u rabo xeerka § 2655. Dhinac kasta ayaa heli kara ogeysiiska bixiyaha dakhliga ee u rabo xeerka § 2655 inta u Waaxda Fulinta Taageerada & Soo-celinta (Department of Support Enforcement & Recovery) kala xidhiidho 207-624-4100 ama http://www.maine.gov/dhhs/ofi/dser/announcements.html. Ogeysiiska ku saabsan ka-xejin dakhli oo ah isla markiiba waxa loo isticmaali karaa in lagu soo ururo baaqiyada taasoo dheeraad ku ah taageerada hadda. Qaddarka ka-xejinta ma aha inu dhaafo xaddeynta u dejiyay xeerka Title 15 United States Code, Section 1673(b); waana in bixiyaha dakhligu u xejiyo oo wasaaradda u soo diro lacag ah $2 halkii todobaad oo dheeraad ku ah qaddarka loo xejiyay taageero ilmo oo kasta.

☐ 15. Kale: ______________________________________________________________

______________________________________________________________

______________________________________________________________

______________________________________________________________

Marka ay dhacdo in Amaro hore ay khilaafsan yihiin Amarkan, waxa u Amarkani leeyahay awoodda sare ama xukumid.

Waxa Amarkan la galiyay galka maxkamadda tixraac ahaan iyada oo la raacayo fariin gaar ah oo ka timid maxkamadda. ☐ "Amarka Ka-xejinta Dakhli ee ah Isla Markiiba" ayaa halkan la socda waana la diiwaangaliyay.

Taariikh: ______________________ ______________________________

Garsoore/Caddaalad/Guddoomiye

Waa Koobi Dhab ah, Marag-fur ______________________

Karaani

**Ogeysiis Muhiim oo ah ku Socda Dhinacyada**

**Dhinac kasta oo raba inu racfaan ka qaato amarka kama-dambeysta ah ee Garsooraha waa inu diidmo ka xereysto amarka kama-dambeys ah taasoo u ka xereysanayo Maxkamadda Degmada 21 maalmood laga bilaabo soo bixista amarka. Xafiiska karaaniga maxkamadda ayaa haya waraaq loogu talogalay ujeeddadaas. Haddii aan diidmo la xereysan, waxa laga soo qaadayaa in dhinacyadu ka tanaasuleen xaqooda inay diidmo keenaan oo racfaan qaataan, waxana u amarka kama-dambeysta ah ee Garsooruhu noqon doonaa xukunka maxkamadda waxana u yeelan doonaa isla saameynta u leeyahay amar kama-dambeys ah oo u saxeexay Garsoore Maxkamad Degmo. Racfaan lagama qaadan karo xukun la soo saaray oo aan lahayn diidmo laga keenay amarka kama-dambeysta ah ee Garsooraha. Racfaanka laga qaatay xukun la soo saaray kadib diidmo waxa loola dhaqmi doonaa si waafaqsan Xeerarka Habraaca Racfaanka ee Maine.**

**Dhinac kasta oo raba inu racfaan ka qaato amar kama-dambeys ah oo u soo saaray Garsoore ama caddaalad waxa u Ogeysiis Racfaan ku xereysan doonaa 21 maalmood gudahood.**

WAA TIXRAAC KALIYA